



Technical Assistance ALLIANCE  
for Parent Centers  
8161 Normandale Blvd.  
Minneapolis, MN 55437-1044  
952.838.9000  
952.838.0190 TTY  
952.838.0199 fax  
888.248.0822 National Toll-free  
alliance@taalliance.org

[www.taalliance.org](http://www.taalliance.org)

# Ogeysiinta Oggolaanshaha Waalidka laga doonayo ee Ilmaha Naafada ee Xannaanada iyo dugsi-billowga ah

Informed Parent Consent for Pre-School and School-Aged Children with Disabilities — Somali version

Sharciga Ogeysiinta Oggolaanshaha Waalidka waxuu ka mid yahay sharciyada ugu muhiimsan ee waalidku leeyahay xaga waxbarashada dadka naafada ah Individuals with Disabilities Education Act (IDEA 2004). Waxbarashada xaga dadka naafada ah waa mid dowlada fedaraaliga ay u sameysay wabarashada gaarka ah. Marka uu ilmahaagu caawimaad helayo xagga waxbarashada gaarka ah, waxaa jirta mararka qaarkood in u dugsigu kaaga baahan yahay qoraal ogolaansha ah inta uusan dugsigu wax u qaban ilmaha. Halka hoose ayaan ku sii faah faahin doonaa. Wuxaad kaloo ka heli kartaa qoraalo la xiriira arintaan qaybta Ogeysiinta ugu Horeysa ee Qoraalka ah.

## Goormuu dugsigu u baahan yahay oggolaanshaheyga?

Waalidku waa in uu bixiyaa ogolaansho:

- inta usan dugsigu qiimeyn ilmaha si loo ogaada in ay leeyihiin wax dib u dhac ah oo ay u baahan yihiin waxbarashada gaar ahaaneed.
- Inta uusan dugsigu u bilaabin ilmaha waxbarashada gaarahaaneed; iyo
- Inta uusan dugsigu dib u sii qimeyn ilmaha si loo ogaado in ay weli leeyihiin dib u dhac ayna weli u baahan yihiin waxbarashada gaarahaneed. (in waalidku ka soo jawaabi wayaa ogeysiinyaa qoraalka ah moyee).

## Maxaa dhacaya inta aanan oggolaanshaha bixin?

- Dugsigu waa in uu ku siyaa wargelin buuxda ee ah ficiilada uu kaa donayo in aad ogalaato.
- Wargelintu waa in ay ahataa mid ku qoran luqaddaada ama si la'isula xiriiro oo aad fahmi karto. Sida luqadda gacmaha looga hadla.

- Dugsigu waa in uu kuu sharaxaa in ay ogalaashahaagu yahay mid aad raali ka tahay, oo aad ka noqon karto goortaad doonto.
- Oggolanshaha aad saxiixeyso waa in uu kuu fasirayo ficiilada dugsigu kaa doonayo. Tusaalo haddaan u soo qaadano, “waxaan ogolaaday in dugsigu ka qiimeeyo ilmahaaya xaga waxbarashada iyo cilmi nafsiga psychological and educational testing”
- Waraaqda oggolaanshaha waa in ay ku qornaataa cid walba ee lal'a socodsiiinayo ilmahaaga arintooda.

## Maxaa kale ayaan u baahanahay in aan oggaado

- Oggolaanshaha waa in aad ku bixisaa si qoraal ah.
- Hadaad ka noqoto oggolaansha qoraalka ah inta uusan dugsigu bilabin arimaha aad isla garateen, dugsigu ma qaadi karo wax ficiil ah.
- Oggolaansho aad oggolaatay in ilmahaaga la qiimeeyo, micnaheedu ma aha in dugsigu u bilaabo ilmaha waxbarashada gaar ahaneed.
- Dugsigu uma baahna oggolaanshahaaga haduu doonayo in uu dib u sii eego arimaha markaa ilmuhi ku sugar yihiin. Sida hawlaha fasalka iyo imtixaannadda horey looga qaaday ilmaha.
- Oggolaansho looma baahna hadu ilmahagu qaadanayo imtixaan la mid ah mid ay ardada kale qaadanayso. In waalidiinta ilmaha oo dhan la waydiiyay oggolaansho moyee.
- Gobolka aad degentahay waxaa laga yabaa in uu leyahay oggolaansho walideed ee

siyaado ku ah midda federalka u dejiyey waxbarashada shaqsiyed ee dadka naafada ah IDEA. Sharciyadaa siyaadada ah waxaad ka heli kartaa sharciyada waxbarashada gaarahaneed ee gobolka.

- Kuguma qasbana in aad oggolaato gebigood ficoladda dugsigu kaa codsanayo. Wuxaad oggolaan kartaa oo keliya qaar ka mid ah ficoladdaa. Dabadeed dugsigu waa in uu kuu fuliyaa kuwa aad oggolaatay.

### **Tusaalooyin xaqiiqa ah oo run u dhacay**

**M**rs. Clark, oo ah bare wax barta ardada heerka labaad ayaa waxa ay aaminsantahay in arday ka mid ah ardadeeda oo la yiraahdo Sam Jones leeyahay dib u dhac xaga waxbarashada una baahan yahay waxbarashada gaarahaneed. Waxay la kulantay walidiinta Sam Mr. iyo Mrs. Jones si ay u ogaysiso sababta iyo sida dugsigu u doonayo in uu u imtixaamo Sam.

Waxay u bandhigtay Mr. iyo Mrs. Jones hawlaha uu Sam fasalka ku qabto iyo sida ay hawlaha qaarkood aad iyo aad ugu adagtahay. Wuxa ay u fasirtay waalidka sida Sam hawlaha waxbarashada fasalka uu qabto uga duwan tahay ardayda caadiga ah ee la heerka ah. Mrs. Clark waxaa kale ay weydiisay walidka Sam waxyaabaha ay dareen ka qabaan xaga waxbarashada wiilkooda.

Mr. Iyo Mrs. Jones waxay ay ogolaadeen in Sam la imtixaamo. Waraaqda oggolaanshaha oo ay saxixeen waxa ay oranaysaa in ay ogladeen in Sam laga imtixaamo xagga cilmi-nafsiga, waxbarashada, iyo hadalka/luqada.

Waraaqdu waxaa kale o ay faraysaa in natiiyada imtixaanka ka soo baxa la'la wadaago Mr. iyo Mrs. Jones iyo ciddii kale ee ku lug leh caawinaada Sam hadii uu u qalmo waxbarashada gaarka ah. Hadii ay Mr. iyo Mrs. Jones oggolaanshaha bixin waayaan, dugsigu awood uma laha in uu imtixaamo Sam.

**W**iil ay dhashay Ms. Romero oo la yiraahdo Carlos ayaa waxa uu u qalmay in loo fidhiyo caawinaad qorshaha waxbarashada shaqsiga ah. Ms. Romero waxa ay la kulantay shaqalaha dugsiga si ay u dejyaan qorsho wabarashada shaqsi u ah (IEP) wiilkeeda Carlos.

Kulankaa oo Ms. Romero ku bixisay qoraal oggolaansho ah oo ay kaga hadlayso qorshaha waxbarashada shaqsiga ah ee loo dejiyay wiilkeeda, marka laga saaro sida uu ku gaari lahaa madasho xagga xisaabta iyo daaweynta laxaadka (physical therapy). Dugsiga waxuu markiiba bilaabay in uu ku dhaqaaqo qorshaha ay Ms. Romero u oggolaatay in ay wax ka qabtaan. Hase ahatee dugsiga wuxuu isku deyayaa sida uu uga dhaadhicin lahaa Ms. Romero in ay isku af gartaan madashada xisaabta iyo daweynta laxaadka.

**G**abadh uu dhalay Mr. Tran oo magaceeda la yiraahdo April Gayaa dabadeed markii imtixaanno laga qaaday la ogaaday in ay leedahay karti la'aan waxbarasho ee aanan sidaa u sii culseyn. Mr. Tran wuu la socdaa in ay gabadhiisu waxbarashadu ku adagtahay, lakiin waxuu tuhmayaa in ay waxbarasho adkida sabab u tahay dugsiga cusub, dhaqan ka duwan dhaqankooda iyo luqadda oo ku cusub.

Mr. Tran waxuu goansaday in uusan bixin oggolaansho waxbarashada shaqsiga ah. Waxuu dareemayaa in ay gabadhiisu ku farxeyn in ay ka qeyb qaadato waxbarashada shaqsiga ah. Waxuu aminsanyahay hadii ay caawimaad ka hesho bare si qaas ah guriga wax ugu bara in ay la qabsan doonto. Waxuu diyaar u yahay in uu helo bare afkooda hooyo ku hadla ee gabadha u turjuma casharada Englishka ah.

Madaama uu Mr. Tran diiday in uu dugsiga siyo oggolaansho, dugsigu uma fidin karo April caawimaadda waxbarashada shaqsiga ah. Mr. Tran iyo dugsiga waxa ay goa'an ku gareen in ay dib u kulmaan qeybta dambe ee dugsiga marka uu baraha ka caawiya April xaga waxbarashada.

### **War bixin Dheeraad ah**

Haddaad donayso in aad ogaato halka aad ka heli karto sharciyada fedaraaliga ee ka yaala oggolaanshaha walidka xagga waxbarashada dadka naafada ah iyagoo ku qoran luqaddaada hooyo, waxaad ka heli kartaa: Qaybta 300.300 ee IDEA 2004.

Haddaad u baahantaha qoraalo ku saabsan waxbarashada shaqsiga ah ee naafada waxaad ka heli kartaa <http://idea.ed.gov>.